

## **Dib u soo celinta Lacagaha Canshuurta Guryaha Minnesota: Hel caawimo si aad u daboosho kharashka kiradaada ama cashuurta guriga!**

Haddii aad tahay mulkiilaha ku leh guri Minnesota ama kirayste, waxa laga yaabaa inaad u qalanto Kaalmada dhaqaale ee la siiyo mulkiilayaasha guryaha and Kaalmada la siiyo Kireystayaasha. Lacag-celinta waxay ku siinaysaa dhimista cashuurta guryaha iyadoo ku xidhan dakhligaaga iyo kiradaada ama cashuurta guriga.

Minnesota waxay leedahay laba barnaamij oo cashuur celin guryaha ah.

### **Cashuurta celinta guryaha joogtada ah**

Canshuur celinta waxay diyaar u tahay mulkiilayaasha guryaha iyo kiraystayaasha leh Lambarka Sooshal Sekuuritiga ama Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha Shakhsiyeed (ITIN) midkood. Waa inaad buuxisaa xadadka dakhliga qaarkood si aad ugu qalanto.

Wixii faah faahin ah, gal websaydka Waaxda Dakhliga ee Minnesota oo ah [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) ku qor **canshuur celinta guryaha** Sanduuqa wax laga raadiyo.

### **Canshuur celinta guriga gaarka ah (oo loogu talagalay mulkiilayaasha guriga)**

Haddii aad tahay mulkiilaha guri, guud ahaan waxaad u qalantaa canshuur celinta gaarka ah haddii ay kuwani run yihiin:

- Waxaad lahayd oo ku noolayd gurigaaga Janaayo 1-deeda sannad kasta
- Canshuurta gurigaaga ayaa kordhay in ka badan 12% (6% sanadkii 2022)
- Korodhka canshuurta guryuhu waxay ahayd ugu yaraan \$100

Si ka duwan canshuur celinta caadiga ah, ma jirto wax xad ku xiran dakhli oo lagu dalbanayo canshuur celin gaarka ah.

### **Sida loo codsado**

Waxaad ku xaraysan kartaa Canshuur Celinta Guriga warqad ama si elektaroonig ah **Agoosto 15**. Waxaad haysataa ilaa hal sano marka la dhaafo taariikhda kama dambaysta ah inaad xarayso.

Xaraynta elektarooniga ah waxay si bilaashka ah uga heli karaan mulkiilayaasha guryaha websaydka dakhliga! Tag [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) ku qor **mulkiilayaasha guryaha** bilaashka ah Sanduuqa Wax laga raadsado.

Si aad u fayl garaysato adigoo isticmaalaya warqad, kaliya buuxi oo soo gudbi Foomka M1PR, *kaas oo ah Kaalmada dhaqaale ee la siiyo mulkiilayaasha guryaha iyo foomka Kaalmada la siiyo Kireystayaasha*.

Tag [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo ka dooro **Find a Form (Hel Foom)** qaybta kore. Waxa kale oo aad wici kartaa ama iimayl u diri kartaa qolada Dakhliga si foomamka iyo tilmaamaha laguugu soo diro boostada:

- **Taleefoon:** 651-296-3781 ama 1-800-652-9094
- **Iimayl:** [individual.incometax@state.mn.us](mailto:individual.incometax@state.mn.us)